

Barnaamijka Goobta Baabuurta La joojiyo ee Aagga Dagganaasha (RPZ)

[Ujrada shatiga RPZ](#)

[Arrimo Ku-saabsan Barnaamijka RPZ](#)

[Sida aad Xaafaddaada Ugaga bilaabaysid Barnaamijka RPZ](#)

[Sida aad u Codsanaysid Shatiga Baabuur-joojinta ee RPZ](#)

Mawducyo RPZ la- xidhiidha

[Sharciga Baabuurta 72-Saac Waddada la Joojinayo](#)

Arrin Ku-Saabsan Barnaamijka RPZ

Meesha waddada qarkeeda ah waa qayb ka mid ah hannaanka waddada dadweynaha, sidaas-awgeedna waa qalab dadweyne oo diyaar u ah dhammaan isticmaalka dadweynaha. In isticmaalka booska waddada qarkeeda ku yaalla oo dadka qaarkood loo xadeeyo waxay ubaahantahay in ay jirto sabab sidaa qasab ka dhigaysa. Barnaamijka Goobta Babuurta La-joojiyo (RPZ) waxaa loo-abuurtaa is loo dabciyo cidhiidhiga ka jira goobta baabuur joojinta ee xaafadaha iyada oo la isku-dheeli tirayo xal-u-raadinta dhibaataadaas iyo baahida ay dhammaan dadweynuhu u qabaan in ay isticmaalaan waddooyinka dadweynaha.

Eeg Sharciga Dawladda Hoose ee Seattle, qaybta ku-saabsan RPZ-yada: [SMC 11.16.317](#)

RPZ waxaa loo aasaasay sakadaha ku dhaggan goobaha dagganaashaha (guryaha, dabakhyada, ama dhismayaasha wadaagga ah) si loo niyad-jabiyo dadka aan dagganayaasha ahayn ee muddada dheer baabuurtooda istaajiya. Waxaa laga yaabaa in cidhiidhiga goobta baabuur joojinta ee ka timaadda goobta oo la daris ah dagmo ganacsi, goobta baabuur joojintuna ay koobantahay, iyo/ama cidhiidhi ka yimid baabuurta soo-booqdayaasha ama shaqaale cusbitaal ama dugsi waxbarasho ama warshad.

Hawlaha ay RPZ qabato waxaa ka mid ah soo dhajinta boodhadhka xadka waqtiga baabuur joojinta ama mamnuucid ay ka reebbanyihiin baabuurta soo bandhigaysa shati baabuur-joojin oo habboon oo ay RPZ bixisay. Dagganayaasha ku nool sakadda RPZ waxay gaadhi-welba oo ay leeyihiin u iibsaa karaan hal shati, dhammaan qoysaska daggan sakadda ay ka jirto RPZ waxay u qalmayaan in uu halkii qoysba oggolaansho u helo hal qof oo marti ah (haddii uu qoysku baabuur leeyahay iyo haddii kaleba). Tirooyinka hoose waxay tilmaamayaan saxeexidda dhigga ah in kasta oo ay xadaynta dhabta ah ee baabuur joojintu ay ku kala duwanaa karto xaaladaha dagaanka ka jira:



Wagtigan xaadirka ah (June 2004) qiimaha shatiga baabuur joojintu waa \$35.00, wuxuuna shatigan shaqaynayaa hal wareeg ama qayb ka mid ah (shatiyada RPZ waxay u badanyihiin kuwo shaqeeya wareeg 2-sano ah laakiin waxaa jira kuwo shaqeeya muddo 1-sano ah). Kharashka lacagta shatiyada ka soo xerooda waxaa lagu bixiyaa kharashka maamul ee lagu fuliyo hawlaha la xidhiidha shatiyada, sidaa-darteed lama xisaabiyo qiimaha jабabka ee ku soo hagaagaya waqtiga wareega ka dhiman ee RPZ ku sii hadhsa. Waxaa shatiyada loo oggolyahay keliya dagganayaasha sida dhabta ah sakaddooda la sudhay calaamadaha ama kuwa dhex daggan xadka RPZ. Shatiyada lama siin karo dadka aan dagganayaasha ahayn, ganacsatada ama shaqaalaha.


Bogga Sare

Sida aad Xaafaddiina Ugaga bilaabaysaan Barnaamijka RPZ

Si aad u aasaastaan RPZ, waa in ay jirto isticmaal xagga baabuur joojinta oo muuqda oo ay samaynayaan dad aan dagganayaal ahayn. Sharciga Dawladda Hoose ee Seattle wuxuu dhigayaa in ay waajib tahay in la dajiyo xaadka qasab ka dhigaya in la aasaaso RPZ. Guud ahaan xadkaa shuruudda laga dhigayo wuxuu yahay in 75% goobaha waddooyinka ka jira ugu yaraan siddeed saacaddod loo isticmaalayo baabuur joojinta, ugu yaraana in 25% baabuurta goobahaas la joojinayana ay yihiin kuwo ay leeyihiin dad aan dagganayaal ahayn, iyo in dhammaan goobahaasi ay yihiin kuwo ka tirsan shan sakadood oo isku-xiga. Waxaa kale oo intaa-dheer oo loo-baahanyahay in la ogaado "isha dhibaataada goobta baabuur joojinta": dhacdada, machadka, ama waxyaalaha kale ee ka-duwan dadka dagganayaasha ah ee sababaya in goobta dagganaashaha la joojiyo baabuur badan oo ay leeyihiin dadka aan dagganayaasha ahayn.

Haddii aad dareensantahay in xaafaddaadu ay u qalanto aasaasidda PRZ, fadlan raac tallaabooyinkan hoose:

Tallaabada 1: Haddii ay suurtagel tahay, la hadal golaha ururka xaafadda ama bulshadu si uu Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT) ugu diro warqad qeexaysa dhibaataada ka jirta goobta baabuur joojinta, oo tilmaamaysa waddooyinka iyo sakadaha ay dhibaataadu ka jirta goobta baabuur joojintu ay sida weyn u saamaysay, oo qeexaysa (illaa heerka ugu sarysa ee aad ogtahay) sababta keentay in ay goobta baabuur joojintu ay si weyn cidhiidhi ugu noqoto (maxaa" dhalinaya' baahida loo qabo goobta baabuur joojinta). Haddii uu golaha bulshada ee xaafaddu uu firfircooni muujin waayo, waxaad dirtaan warqad ay saxeexeen 25 qof oo si isle'eg ugu baahsan shanta sakaotood (tusaale ahaan, shan sakadood oo kala- duwan oo daris ah oo ugu yaraan sakad welba ay kaga jiraan shan qoys).



Hal Sakad

Waxaad warqadda u dirtaan;

Seattle Department of Transportation
Residential Parking Zone Program, 37th Floor
700 Fifth Avenue, Suite 3900
PO Box 34996
Seattle, WA 98124-4996

Fadlan waxaad soo raacisaa magaca qofka lala soo xidhiidhayo, ciwaankiisa iyo lambarka taleefonka maalinimada laga heli karo.

Go'aanka Ugu-horeeya

Tallaabada 2: Marka la guddoomo codsiga qoraalka ah ee lagu dalbanayo RPZ, waxay SDOT bilaabi doontaa baadhitaan lagu go'aaminayo bal in ay RPZ goobtaa ku- habbontahay iyo in kale.

Go'aanka waxaa lagu salayn doonaa arrimahan hoose:

- In dhibaato xagga goobaha baabuur joojintu ay ka jirto ugu yaraan shan sakadood oo daris ah.
- Haddi ay u muuqato in goobaha baabuur joojinta 75% ama in kabadan la isticmaalay.
- Haddii ay jirto sabab muuqata oo dhalinaysa dhibaato xagga baabuur joojinta ah.

Ficilka SDOT

Tallaabo 3: Haddii ay SDOT go'aamiso in RPZ ay goob ku-habboontahay, waxaanu la soo xidhiidhi doonaa dhinacyada danaynaya, waxaa kale oo jadwal loo dajinayaa daraasad la xidhiidha RPZ. Haddii ay tirada codsiyada RPZ-yadu ay badantahay, waxaa laga yaabaa in ay goobuhu liiska sugayaasha ay galaan oo ay sugaan daraasadaha la-xidhiidha RPZ ee lagu samaynayo goobaha baanuurta la joojiyo.

Marka ay SDOT bilowdo in ay qaaddo tallaabo ku wajahan codsiga, waxaanu marka hore abaabuli doonaa guddi xaafadeed oo matalaya danaha bulshada. Hawsha guddigani waxay noqon doontaa in uu SDOT ka caawiyo naqshadaynta RPZ oo wax kaqaban doontaa cidhiidhiga ka jira melaha baabuurta la joojiyo ee goobtaa ka jira. Isla-markaana waxaanu darsaynaa xaaladda meelaha baabuurta la joojiyo ee goobtaa. Arrimaha kala-duwan ee lagu baadhayo daraasadda RPZ ee lagu ogaanayo in goobtu ay uqalanto aasaasidda RPZ iyo in kale waxaa ka mid ah shuruudahan hoose.

- In meelaha baabuurta la joojiyo waqtigan xaadirka ah 75% ka tirsan ugu yaraan la isticmaalayo siddeed saacadood.
- In 25% baabuurta ay yihiin kuwo ay leyihiin dad aan dadganayaal ahyn.

Ficilka Bulshada

Tallaabo 4: Haddii ay daraasadda RPZ ay soo saarto in xaaladaha jira ay oggolaanayaan in RPZ la dhiso, xaafadduna ay doonayso in mashruuca la sii wado, SDOT waxay codsadaayaasha ay siin doontaa foomam codsi oo lagu ururinayo ugu yaraan saxeexyada 60% qoysaska xaafadda laga hadlayo daggan (kuwa guryaha leh iyo kiraystayaasha). Waxaa halkii qoysba looga baahanyahay hal saxeex keliya.

Haddii ay goobtu buuxin waydo shuruudaha daraasadeed ee meelaha baabuur joojinta ama la heli kariwaayo taageerada 60% ee loo qabo RPZ, lama dhisayo RPZ. Haddii ay goobtu buuxiso shuruudahan, SDOT way dhisi doontaa RPZ. Laga bilaabo waqtiga ay SDOT go'aankeeda shaaciso, muddo 15 maalmood gudahood ah ayaa go'aankaa rafcaan laga qaadan karaa, waxaana rafcaanka loo-gudbinayaa Agaasimaha SDOT **Grace Crunican**.

Waqtiyada Hawlaha RPZ

Waqtiyadan hoose ee hawlaha waxay tilmaamayaan geeddi socodka guud ee RPZ, waxaanad u fiirsataa in waqtiga ay qaadanayso abuuridda RPZ ay si weyn u kala-duwanaa doonto iyada oo ku-xidhan kolba xaaladaha dagaanada kala-duwan ka jira. Xaaladaha noocaas ah waxaa ka mid ah baaxadda ay goobtu leedahay, heerka weynida dhibaataada meelaha baabuur joojinta ka jirta, isticmaalka dhulka ku wareegsan iyo go'aan qaadashda bulshada.

<i>Bisha 1^{aad}</i>	<i>Bisha 2^{aad}</i>	<i>Bisha 3^{aad}</i>
Warqadda xaafadda ka socota ee lagu codsanayo RPZ	SDOT ayaa fulinaysaa go'aamin hordhac ah, waxayna natiijada la socodsiinaysaa dhinacyada danaynaya	Haddii uu go'aanka hordhucu tilmaamayo in ay suurtagel tahay in shuruudaha RPZ la buuxinayo, SDOT waxay dajinaysaa jadwal lagu fulinayo daraasadda baabuur joojinta ee RPZ. Waxaa la isugu-yeedhayaa guddiga xaafadda

Bilo ay tiradoodu kala-duwantahay	Bisha 1 ^{aad} Kaddib marka la bilaabo daraasadda RPZ	Bisha 3 ^{aad} Marka la bilaabo daraasadda RPZ
Waxaa lagayaabaa in ay	Waxaa bilaabmaysa daraasadda meelaha	Haddii shuruudda la buuxiyo, waxaa

xaafaddu gasho liiska sugayaasha ee daraasadda meelaha baabuurta la joojiyo ee RPZ iyada oo laga duulayo tirada codsiyada la soo gudbiyay ee RPZ	baabuurta la joojiyo, guddiga xaafadduna wuxuu bilaabayaa caawinta naqshadaynta RPZ	bilaabmay geeddi socodka ururinta taageerada
--	---	--

Bilo ay tiradoodu kala-duwantahay	Bisha 1 ^{aad} Kaddib marka taageero ururinta la sameeyo	Bisha 3aad kaddib marka marka taageero ururinta la sameeyo
Taageero ururinta ayaa la fuliyay	SDOT ayaa naqtiin ku samaynaysa taageerada la ururiyay, waxayna qorshaynaysaa qotominta calaamadaha RPZ iyo bixinta shatiyada	SDOT ayaa qotominaysa calaamadaha, waxayna bixinaysaa shatiyada

Dabagelka RPZ

Waxaa loo-baahanyahay in RPZ naqtiin lagu sameeyo muddo lix bilood gudahood ah kaddib marka la dhaqan-geliyay, dib-u-habayna lagu sameeyo naqshadaynteeda, haddii sidaa loo-baahdo, si markaa loo daboolo baahida ay bulshadu u qabtomeelaha baabuurta la joojiyo. SDOT waxay xadayn dheeraad ah ay ku samayn kartaa xadka waqtiga (iwm) ee ku-wajahan kuwa aan shatiga haysan, haddii uu sii socdo cidhiidhiga ka jira ee dagaanka ka haysta dhinaca meelaha baabuurta la joojiyo kaddib markii la qotomiyay RPZ, oo ay dagganayaasha xaafadda intooda badani ay saxeex ku-muujiyaan in ay taageersanyihiin sii kordhinta xadaynta. Waxaa kale oo ay SDOT karaysaa in ay dabciso xadadka waqtiga (iwm) ee kuwa aan shatiga haysan, haddii aynu go'aamino in la isticmaalayo in ka yar 50% meelaha baabuurta la joojiyo kaddib markii la qotomiyay RPZ ayaa dabcintaa la samayn karaa.

Sii fidinta RPZ

RPZ- da la aasaasay ee jirta sakad (sakado) kale oo daris ah waa lagu soo dari karaa, haddii ay dadka sakadahaas daggan ay sidaas danaynayaan, SDOT-na ay go'aamiso in sii balaadhinta RPZ ay munaasib noqonayso. Sakado kasta oo laga fikirayo in lagu soo karo waa in ay noqdaan kuwa la daris ah RPZ- da hore u jirtay, 60% qoysaska sakaddaas ku noolna ay taageeraan fikirka lagu doonayo in sakaddooda lagu daro RPZ oo ay ku saxeexaan foomka RPZ ee ay bixinayso SDOT.

Sida loo soo gudbinayo codsiga shatiga meesha baabur-joojinta ee RPZ

Si aad ugu qalantid shatiga meesha baabuurta la joojiyo, waxaa waajib kugu ah in aad ku nooshahay xadka goobta baabuurta la joojiyo ee dagganaashaha (RPZ). Kahore intaanad codsan shatiga, fadlan xafiiskayga soo wac, taleefonka (206) 684-5086 si aad u hubisid in uu ciwaankaagu ka tirsanyahay xadka RPZ iyo/ama u codsatid foomka codsiga.

Si aad u heshid shatiga RPZ waxaa waajib kugu ah in aad soo-gudbisid foom codsi oo dhamaystiran iyo:

1. Caddayn waqtigan taagan ah (la bixiyay 30-kii maalmood ee tagay gudahood ah) oo muujinaysa in aad goobta daggantahay oo ay magacaaga iyo ciwaankaagu ku qoranyihiin. Tani waxay noqon biil, warbixinta xisaabaadka ee baanka, heshiis kiro, risiidhka kirada, ama farriin-kasta oo kale oo meheradeed oo ka-duwan ta uu xafiskayagu kuu soo dirayo.

2. Nuqulka caddaynta diiwaangelinta baabuurta ee Gobolka Washington oo waqtigan taagan ah. Waa in uu baabuurku ku diiwaan-gashanyahay magacaaga ama magac la mid magaca saddexaad (ka ugu dambeeya) ee lagu muujiyay caddaynta dagganahanimada. Darajooyinka, diiwaangelinta ku meel-gaadhka iyo biilalka iibka lama oggolaanayo. Diiwaangelinta gobolka ka baxsan keliya waxaa la oggolaan karaa haddii uu qofku yahay xubin ciidanka ka tirsan oo keeni kara caddayn muujinaysa xaaladda uu qofku ku suganyahay, ama haddi uu yahay arday gobolka ka baxsan oo keeni kara caddayn xaaladdiisa muujinaysa.

Lacagta waqtigan xaadirka ah (Laga bilaabo January 1, 2005) shatiga laga bixinayo way kale-duwanaa kartaa iyada oo uu caddadka ugu badan gaadhi karo \$35, halkii gaadhiba, waxayna lacagtu ku xidhnaan kartaa goobta aad daggan (ama meesha aad goobta ka-daggantahay), wuxuuna shatigu shaqaynayaa hal wareeg ama qayb ka-tirsan (RPZ-yadu waxay u badanyihiin kuwa shaqaynaya wareeg 2-sano ah, laakiin waxaa kale oo jira kuwo wareeg 1-Sano ah). Waxaanu oggolnahay lacagta, jeegyada, amarada lacageed, iyo "VISA" iyo "Mastercard"

Qoysaska xaafadda dhex daggan waxay halkii baabuurba ay u iibsanaa karaan hal shati. Waxaa halkii-qoysba loo-oggolyahay hal shati oo ka martida ah. Waqtigan xaadirka ah lacagta shatiga martida ah (laga bilaabo January 1, 2005) waxay u dhaxaysaa \$0 ilaa \$35. Fadlan soo wac taleefonka (2006) 684-5086 si aad faahfaahinta u heshid.

Waxaa kale oo aynu shati ku-meelgaadh ah oo illaa 60 maalmood ah siinnaa baanuurta dhismaha, baabuurta cusub iyo baabuurka uu ardaygu leeyahay.

Goobaha iyo Saacadaha

Dhammaan shatiyada waxaa la soo marinayaa boostada ama shakhsiga ayaa imanaya oo qaadanaya.

Fadlan si aad u soo-jeedisid wixii su'aal ah ee aad qabtid kala soo xidhiidh Qaybta Shatiyada Tiraafiigga, saacadaha shaqada, Isniinta illaa Jimcaha inta u dhaxaysa 8:00 Am illaa 5:00 PM, ama soo wac (206)684-5086.

Waxay Qaybta Shatiyada Tiraafigu ku taallaa dabakha 37aad ee Dhismaha Dawladda Hoose ee Seattle (hore la odhan jiray Key Tower) ee ku yaalla 700 Fifth Avenue (Waddada Kolombiya) ee Seattle.

Ciwaanka hoose ku soo hagaji:

Seattle Department of Transportation
Traffic Permits, 37th Floor
700 Fifth Avenue, Suite 3768
PO Box 34996
Seattle, WA 98124-4996

Si aad xog gaar ah u heshid, ama si foomka codsiga laguugu soo diro, fadlan soo-wac (206)684-5086.